

Sheekada Cagaarshowga B ee Bilan




Bilan waxey aaday dhaqtarka sababtoo ah uur ayey laheyd. Dhaqtarkeeda wuxuu baaritaan ku sameeyay dhiigeeda. Baaritaanka wuxuu tusay iney leeday cagaarshowga B. Dhaqtarkeeda wuxuu kula taliyey iney ilamaheeda ka talaasho cagaarshowga B marka uu dhasho.




Bilan wax badan kama aqoon cagaarshowga B. Waxey dhaqtarkeeda weydiisay su'aalo, laakiin waxey dareentay iney dooneyso inay cilmi-baarlis iyada iskeed u sameyso. Waxey dareentay hadii ay wax badan ka fahamto arinta iney ooga wanaagsanaan doonto.



Marki ay wax badan ka baratay cagaarshowga B, Bilan waxey aqrisay in ceeboyn ay la xiriiraan infekshanka. Inkastoo ay ka walwaleysey iney u sheegto asxaabteeda iyo qoyskeeda, hadana waxey fahamtay in ka hadalka xanuunkeeda ay caawino karto la dagaalanka ceebooyinka.



Bilan qoyskeeda iyo asxaabteeda su'aalo badan ayey ka qabeen cagaarshowga B waxeyna taagerayeen Bilan. Waxey ku qanciyeen iney weli asxaab dhow ey ku tiirsan karto ay u ahaan doonaan.



Bilan waxey dareentay dhiiragelin ka dib markey la hadashay qoyskeeda iyo asxaabteeda. Waxey weydiisay dhaqtarkeeda su'aalo ku saabsan cagaarshowga B, iskeeda wax oga aqrisay, lana dagaalantay ceebaha la xariira iyadoo u sheegtagtay xanuunka lagu sheegay qoyskeeda iyo asxaabteeda. Waxeyna qorsheyneysaa iney ilmaheeda ka talaasho cagaarshowga B, si ay cudurka oga difaacdoo ilmaha. Waxey ogeyd iney diinta Islaamka ay muhiim u tahay inaad caafimaadkaaga difaacdoo si adigoo caafimaad qaba aad u cibaadeysato. Bilan waxey aad ugu qanacday nafsadeeda iyadoo qaaday mas'uuliyada caafimaadkeeda iyo caafimaadka ilmaheeda iyadoo tix gelineysa diinteeda.



Bilan waxey ku faraxday iney ogaato xaaladeeda cagaarshowga B. Sidaa daraadeed, waxey hubin kartaa in ilmaheeda la talaalo, iyo iney qoyskeeda kula teliso iney iyaguna is talaalaan. Waxey baratey in cagaarshowga B uu yahay infekshan lagu maamuli karo booqashooyinka dhaqtarka iyo hab-nololeed caafimaad leh.